

Axkaamu Zalaat (Salaada)

الحمد لله رب العالمين والصلاة والسلام على أشرف الأنبياء والمرسلين نبينا محمد
وعلى آله وصحبه أجمعين

Mahad oo dhan Alaah iska leh Rabiga caalam ka abuurey Allaha ha amaano nabigeena sharafta badnaay anbiyada kan ugu fadliga badan & anbiyada lasoo direy dhamaantood Caleyhimusalaam Jamiican.

> **Salaada Waajibka ah** : Waa Shanta Salaadood Oo Kala ah
1-Subax =2rakcadood 2-Duhur (4 rakco) 3- Casar (4 rakcadood)

4-Maqrib (3 rakcadood) 5- Cishe (4 rakcadood)

Tirada Rakcaddaha La Tukado Waa 17 Rakcadood Guud ahaan

** **Fiirogaar ah**: Salaada Waa In Arkaanteeda Iyo Shuruudeeda U Dhamaystirantahay.

> **Salaadaha Sunnah ah** : Sunnoyiinka way badan yihiin laakiin dhamaantooda halkaan ayaan ku xuseynaa inshalaah Waana sidaan Hoos Ku Xusan.

> **Sunnaha Mu"akaddah** : Sunnada mu"akadaha (Sunnooyin Lalaazimo) waa sunnooyin la tukado salaadaha waajibka kadib ama ka hor oo qof inuu daa"imo (Yacni joogteeyo) Tiradoodana waa 12 Rakcadood waxaa qofka u tukunaayaa salaadaha waajibka kadibsida axaadiista ku cad.

>> **Salaada Subax** =2rakcadood ka horeysa

>> **Salaada Duhur** 4 rakcoddooda horeysa 2 Rakcad ka danbeeya

>> **Salaada Maqrib** 2 rakcadood Kadanbeeya

>> **Salaada Cishaha** 2 rakcadood ka danbeeya

Tirada rakcadaha waa **12 Rakcadood** Dardaarinkii Rasuuleena Scw

صلى الله عليه وسلم Wuxuu ahaay Qofkii Xafida Yacni Ilaaliya Jannada ayuu ku Galaayaa Lama Dhihin Qofkii iska Tukadda markuu rabana Dhaafa Walaalkeey/Walaasheeyda Muslinka Ku Buraarug Inshlaah.

Waxaa kale jira sunnoyiin kale oo axaadiista Rasuulka scw **صلى الله عليه وسلم** Tilmaantey waxaana kamid ah Qofkii tukadda salaadaha hoos ku xusan.

1-Duhur (4 Rakacadood kadanbeysa Tusaale 2 (Labo) rakacadood ka danbeeysa 2(Labo) ku dartey markaaseey 4 rakso isku noqotey)

2- Casar (4 rakcadood Ka Horeysa) Rasuulka yiri s c w **صلى الله عليه وسلم** Qofkii Tukadda allaha u naxariisto salaada casar 4 Rakcadood ka horeysa.

3-Maqrib (2 rakcadoodka horeysa Aadaanka maqribka kadib salaada maqrib intaan lagelin kahor) 4- Ciske (2 rakcadood ka horeysa)

^^**Tirada Guud** Waa 2 Duhur +4 Casar+2 Maqrib +2 Cishaha = **10 Rakcadood**

^^Sunnooyinka Raatibada ah 12 Rakcadood =Total waa 22 Rakcadood Sunna ah.

Waxaa Jira Sunnooyin Kale Sida Salaatu Duxaa Waxaa jirta Salaatul Layl

> **Salaatul Istikhaar** : Waa Salaad Qofka Rabigiisa weydiisanaayo oo uu tukunaayo Ujeedooyin oo uu leeyahay ee qofka bani"aadankana uusan kala garanaynin in ay kheyir u tahay ama in ay shar u tahay Sida Qofka Raba.

> Inuu Guursado

>Inuu Ganacsi galo

>Inuu Gaari iibsado

>Inuu Guri Dhisto iyo wixii lamid ah qofka wuxuu hor istaagaayaa 2Rakacadood oo uu tukunaayo sid rabi u weydiisto howshaas uu galaayo kheyir keeda sharkeedana uga magan galo.

Ilaahaan Uga Mahad Celin **الحمد لله رب العالمين** Oo Ii Fududeeyey Inaan qoro Risaaladaan Axkaamu salaad oo allaaah i Waafijiyey aan Walaaladayda aan Ugu soo Gudbiyo Luuqadda Af Soomaliga Marka Waxay Khaladaad Yeelato Risaaladaan Ama Gaabinah & Luuqada Soomaliga Erayada qaarkood Aan Qeexi waayo Waxay Ka timid Nafteyda & Shaydhaan Waana Uga Toobad Keeni Allaah iyo Rasuulkeena S.c.w Bari Ayeey Kayihiin Naseexadiina Waan U

Baahanahay Yaan La iga Iloobin Walaalkasto Ka Faaideysta Ama Akhristo ama Wax Kusii Daro Ilaahay (i weyddiisa) iiga Barya Aniga & Labadayda Waalid & Reerkayga In Allaah Na Waafijiyo Tubta Toosan & Khaatimadda Toosan Aniga Iyo Idinkanna Allaah Haynagu Kulmiyo Jannooyinkiisa Wanwanaagsan **Aamiin Yaarabi**.

Waxaa Qorey : Walaalkiin **Cabdiladhiif Aadan**
Akhiizubeyr_1@hotmail.com

! !!!Ÿ!!!! ! !! !!!!! !!!ÉÉ!!!! !!!!! !!

هذا والله أعلم
لا تنسونى بالدعاء أخوكم **زبير_١**